

# Waxaa Xareeyay Amarka ilaalinta.

## Iminka maxaa xiga?



DACWOODUHU waa  
adiga.



EEDEYSANUHU waa qofka aad  
ka xaraysay OP-ga.

Hadii lambarkaaga OP uu ku qoran yahay 'OP'-ga, amarkaaga waxaa laga xareeyay maxkamada Madasha Guud (tusaale ahaan: 20OP1234).

Hadii lambarkaaga OP uu ku qoran yahay "X", amarkaaga waxaa laga xareeyay maxkamada Circuit (tusaale ahaan: 20X1234).

*Hadii lagu siiyay OP kumeel gaadh ah, Eedeysanuhu waa in aanu si toos ah ama dadban kuula soo xidhiidhin adiga wixii intaa ka danbeeya. Markasta hayso nuqulka saxeexa ee OP-gaaga.*

## Waxaa dhacaya ee xiga?

- Xafiiska Bilayska (DCSO) waxa uu isku dayi doonaa inuu ku wargeliyo Eedeysanaha OP-ga in laga xareeyay. OP-gaaga ma dhaqan galayo ilaa inta Eedeysanaha la siiyo "wargelinta" ama la "siiyo" OP-ga.
- 'Wargelintu' waxay ka dhigan tahay in Eedeysanaha lagula xidhiidhay taleefanka oo la siiyay 'wargelinta' OP-ga. Weli taariikhda maxkamada lama qabin hadii qofka kaliya la siiyay wargelinta, laakiin waxa aad welii xarayn kartaa dacwadaada dambi hadii OP-gaaga lagu xadgudbo.
- 'Siintu' waxay ka dhigan tahay in Eedeysanaha la siiyay nuqlu daabacan oo OP ah oo uga yimid DCSO. Tani waxay ku xidhan tahay in DCSO uu yahay macluumaad wanaagsan oo lagala xidhiidhayo Eedeysanaha. Hadii aad ka hayso macluumaad xidhiidh ah oo cusub ama dhaama Eedeysanaha kadib marka aad xarayso OP-gaaga (sida lambar taleefan oo cusub, meel cusub oo uu ka shaqeeyo, cinwaan cusub, imm.), kala hadal DCSO 615-880-3793 si aad u siio macluumaadka cusub.
- Kadib marka OP la bixiyo, waxaa lagu siin doonaa taariikhda maxkamada ee cusub ee dhagaysiga ee OP. DCSO waxay kugula soo xidhiidhi doontaa taleefanka si ay kuugu sheegto taariikhda iyo saacada dhagaysiga. Hadii ay kugu waayaan taleefanka, waxay kuu soo diri doonaan warqad adiga kugu socota oo laguugu sheegayo dacwadaada OP.

## Sida Loo Qabo Amaanka ee Looga Warbixiyo Tacadiga

- **La hadal 911** hadii aad ku jirto khatar dhakhso ah, sida hadii Eedeysanuhu uu kuu soo dhawaado.
- **La hadal lambar wixii degdega aan ahayn ee 615-862-8600** si aad uga warbixiso wixii ah in laguu yimid ama xadgudubka.
- **Kaydi wixii cadaymo ah** ee ku xad gudubka ama xidhiidhka (fariimo qoraal ah, fariin cod ah, sawiro, waxyaabaha baraha bulshada lasoo dhigay, imw.).
- **Samaysashada qorshaha amaan** ee Xafiiska Amaanka Qoyska (macluumaadka xidhiidhka ee kaydka).
- **Iska duwaan gel Smart911** si aad ugu sheegto obireetarka 911 inaad haysato OP ku jira [www.smart911.com](http://www.smart911.com).
- **Sii nuqulka OP-gaaga** dhamaan dadka muhiimka ah ama meelaha sida meesha aad ka shaqayso, dugsiya/daryeelka ilmaha, qoyska, jaarka, iwm.



# Macluumaadka maxkamada

Taariikhdaada maxkamadu waa inay noqoto 15 maalmood gudahood celcelis ahaan oo ka bilaabanta wakhtiga Eedeysanaha la siiyo OP.

Hadii OP-gaaga loo qorsheeyay Madal Guud oo maxkamadeed, dhagaysigaaga waxa uu noqon doonaa Maxkamada Danbiga Degmada Davidson (Cadaalada A.A. Birch Building). Waa inaad timaadaa qolka maxkamada 4B ugu danbayn 9:15 subaxnimo maalinta maxkamada.



408 2nd Ave. N.  
Nashville, TN 37201  
Xafiiska karaaniga: 615-862-5195

Hadii OP-gaaga loo qorsheeyay maxkamada Circuit, dhagaysigaaga waxa uu noqon doonaa Maxkamada Degmada Davidson (Historic Courthouse on Public Square). Waa inaad timaadaa 8:45 subaxnimo maalinta maxkamada.



1 Public Square  
Nashville, TN 37201  
Xafiiska karaaniga: 615-862-5181

Kahor maalinta maxkamada, **Xarunta U Ololaynta Jean Crowe** (macluumaadka hoose) si aad ula hadasho u ololeeyaha amaankaaga, oo uu kaaga jawaabi karo wixii su'aalo ah ee aad ka qabto maxkamada.

*Waxaa muhiim ah inaad u timaado maxkamada OP-gaaga si laguugu ogolaado. Hadii aanad iman karin dhagaysiga, kala xidhiidha lambarada Xafiiska Karaaniga ee sare si aad ugu sheegto qof aad garanayso.*

## Halka Aad Ka Heleyso Kaalmada

Xafiiska Amaanka Qoyska Metro Nashville waxa uu leeyahay laba meelood oo aad la hadli karto ama booqan karto wixii kaalmada tacadiga guriga dhaxdiisa, taxadiga galmo, tacadiyada ilmaha, tacadiyada waayeelka, daba gurida, ama tahriibinta bilaa aadanka.



### Xarunta Amaanka QOyska (FSC)

iska imaatinka iyo balamaha  
610 Murfreesboro Pike  
Isniiin - Jimce, 9:00 subaxnimo - 6:00  
galabnimo  
615-880-1100  
Kaalmada OP waxaa la heli karaa 24/7



### Jean Crowe Advocacy Center (JCAC)

gudaha maxkamada  
100 James Robertson Pkwy., Suite 114  
Isniiin - Jimce, 7:45 subaxnimo - 4:30  
galabnimo  
615-862-4767

U ololeeyayaasha goobahooda waxay ka caawin karaan qorshaha amaanka, qiimaynta heerkaaga amaanka, ku xidhnaanshaha khayraadka, inaad wax ka ogaato tacadiga dadka dhaxdiisa, iyo inaad ka hesho kaalmo ka warbixinta ama nidaamka maxkamada.

### Hay'ado kale oo ku caawin kara wakhtigan waxaa kamid ah:

- **Domestic Violence Division (Waaxda Tacadiga Guriga Dhaxdiisa ee MNPD):** 615-880-3000
- **Sex Crime's Unit (Qaybta Danbiga Galmada MNPD):** 615-862-7560
- **District Attorney's Office (Xafiiska Xeer Ilaaliyaha Degmada):** 615-862-5500
- **Legal Aid Society (Bulshada Kaalmada Sharci):** 615-244-6610
- Khadka tooska ah ee tacadiga guriga dhaxdiisa **YWCA** 24/7: Khadka fariimaha 1-800-334-4628: 615-983-5170
- Xarunta tacadiga guriga dhaxdiisa ee **Morning Star:** 615-860-0003
- **Family and Children's Services (Khadka mushkiladaha Adeegyada Qoyska iyo Caruurta):** 615-244-7444